

SAHMI OO DIYAARGAROW



Markuu ardaygaagu isu diyaarinayo *raadinta kulliyada*, waxaa jira shuruudo cusub oo la ogaado iyo hawlo la dhammaystiro. Haddii aanu nahay Minnesota, waxaan ku faraxsannahay inaan ku caawino adiga iyo ardaygaaga. Waxaan kugula talinaynaa inaad bilowdo ficiladaan:

Sahan ku samee dhismaha jaamacadda



Mid ka mid ah qaababka ugu muhiimsan ee lagu fahmo in kulliyad ay ku habboon tahay ayaa ah in sahan lagu sameeyo dhismaha jaamacadda. Haddii aanu nahay *U of M*, waxaan bixinaa qaabab badan oo lagu arko dhismaha jaamacadda, balse waxaan kugula talinaynaa inaad marka hore kala xiriirto Jaamacadda onlayn adoo u marayo wicitaano fiidiyow oo aad la yeelato *talo-bixiyeyaasha diiwaangelinta* (wicitaano telefoon ayaa sidoo kale la heli karaa) iyo *booqashada onlaynka ah ee dhismaha jaamacadda*. Si aad sahan ugu sameeyo dhismaha U of M adigoo adeegsanayo qaab onlayn ah, booqo z.umn.edu/visitcampus.

Ka fikir danaha



U of M waxay leedahay in ka badan 150 *takhasusyo gaar ah* iyo 150 *takhasusyo labaad*, kuwaasoo siiya ardayda qaabab badan oo ay ku raacdaan danahooda. Si aad u aragto takhasusyada gaarka ah iyo takhasusyada labaad ee laga bixiyo U of M, booqo majors.umn.edu. Haddii ardaygaagu uusan aqoon waxa uu doonayo inuu barto, weydii waxyaabaha uu xiiseeyo, maadooyinka uu ugu jecel yahay dugsiga, iyo noocyada shaqooyinka uu xiiseynayo.

Qorshee koorsooyinka



U of M ayaa uga baahan *ardayda la filayo* inay ka bogaan *shaqada koorxada* ee dugsiga sare maadooyin gaar ah. Waa muhiim inay ardaydu qaataan casharro adag oo ku saleysan waxa laga heli karo dugsigooda. Koorsooyinka waxay u diyaariyaan ardayda kulliyada, waxayna ka caawiyaan inay soo gudbiyaan *arji* xooggan. Si aad u aragto casharrada U of M u baahan tahay, booqo mareegta z.umn.edu/collegesearch.

Gal Imtixaanka ACT ama SAT



Imtixaanada la jaangooyay, sida ACT ama SAT, waxay cabbiraan aqoonta ardayga u leeyahay afar maaddo: Ingiriisiga, xisaabta, akhriska, iyo sayniska. Imtixaanadaan waxaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo u-diyaarsanaanta ardayga casharrada kulliyada. **Fadlan ogow:** Jaamacadda Minnesota Twin Cities uma baahna doonto buundada ACT ama SAT ilaa arjiga 2027.

Su'aalo na weydii



Waxaan ku dhiirigalineynaa qoysaska inay ku soo biiraan ardaydooda markay bilaabayaan raadinta kulliyada. Haddii aad wax su'aalo ah qabto inta lagu gudajiro raadinta kulliyada ee ardaygaaga, fadlan kala xiriir U of M Office of Admissions (Xafiiska Diiwaangelinta) telefoonka 612-625-2008 ama 1-800-752-1000, ama kala xiriir mid ka mid ah talo-bixiyeyaashayada diiwaangelinta barta z.umn.edu/counselor. Waxaan ku faraxsannahay inaan ku taageerno adiga iyo ardaygaaga marka aad dhammaystiraysaan tallaabooyinka muhiimka ah.

ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADA EREYGA	QEEXITAANKA
Admissions Counselor	Talo-bixiyaha Diiwaangelinta	Xubin shaqaale ka ah kulliyad oo taageera ardayda inta lagu gudojiro safarkooda raadinta kulliyad
Application	Arji	Foomka iyo dukumiintiyada ardaygu siiyo kulliyada si loogu tixgeliyo diiwaangelin
College Search/Journey	Raadinta/Safarka Kulliyada	Tallaabooyinka ardaygu qaado si uu u ogaado oo u helo kulliyadaha uu xiiseynayo
Coursework	Shaqada koorsada	Casharrada ardaygu qaato si uu u dhammaystiro shuruud, sida ka qalinjabinta dugsiga sare
Major	Takhasus Gaar ah	Halka diirada gaarka ah ardaygu ka saarayo waxbarashada. Takhasuska gaarka ah waa waajib ah si loo qalinjabinyo.
Minor	Takhasus Labaad	Halka labaad ee diirada gaarka ah ardaygu ka saarayo waxbarashada. Takhasuska labaad waajib ma ahan.
Prospective Student	Ardayga La Filayo	Arday xiiseynaya inuu dhigto kulliyad
Standardized Test	Imtixaan La Jaangooyay	Imtixaan cabbira fahamka ardayga ee mawduuca iyo u-diyaarsanaanta waxbarasho ee casharrada heerka jaamacadeed
U of M	U of M	Magaca la soo gaabiyay ee Jaamacadda Minnesota Twin Cities
Virtual Campus Tour	Booqashada Fog ee Dhismaha Jaamacadda	Ikhtiyaar onlayn ah oo loogu talagalay in ardayda ay u arkaan dhismaha jaamacadda iyagoo shaqsiyan booqan



//

JAAACADDA MINNESOTA

ERAYADA MUHIIMKA AH EE GAARKA U AH U OF M	FASIRAADA EREYGA	
System Campuses	Nidaamyada Dhismooyinka Jaamacadda	<p>U of M waxay ku leedahay 5 xarumood gobolka Minnesota. Waxay ku yaalaan Crookston, Duluth, Morris, Rochester, iyo Twin Cities. Xarun kasta waxay leedahay codsasho diiwaangelin oo u gaar ah.</p> <p>U of M Twin Cities waxay ku leedahay laba xarumood goobteeda: Minneapolis iyo St. Paul.</p>
Colleges versus University	Isbarbardhiga Kulliyadaha iyo Jaamacadda	<p>Kulliyad waa dugsi yar oo bixiya shahaadooyinka heerka koowaad ee afarta sanno ah. Jaamacaddu waa dugsi weyn oo bixiya shahaadooyinka heerka koowaad ee afarta sanno ah, iyo shahaadooyin kale oo ah heer ka sii sareeya, sida takhasuska daawada ama ilkaha.</p> <p>Jaamacadda Minnesota Twin Cities waa jaamacad leh 8 kulliyadood oo qaadata arday cusub (ardayda cusub ee ka qalinjabisa dugsiga sare) ama arday wareejis ah (ka soo qaatay casharro kadib dugsiga sare kulliyad ama jaamacad kale):</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dugsiga Maamulka ee Carlson • Kulliyada Cilmiga Naflayda • Kulliyada Naqshada • Kulliyada Waxbarashada iyo Horumarinta Aadanaha • Kulliyada Cuntada, Cilmiga Beeraha iyo Cilmiga Kheyraadka Dabiiciga ah • Kulliyada Suugaanta, Falsafada, Luuqadda, Xisaabta iyo Taariikhda • Kulliyada Sayniska iyo Injineernimada • Dugsiga Kalkaalisnimada